

Soonka maalinta caashuura

صوم يوم عاشوراء

Walalayaal waxaan halkaan idiinku soo gudbinaynaa, kalmado kooban oo kussabsan FADLIGA SOONKA MAALINTA TOBONAAD EE BISHA AL-MUHARRAM oo ah bisha koowaad ee sanadka HIJRIGA..oo aan hadda kujirno. Bisha Al-muharram waa bil barakaysan oo ku wayn Allaah agtiisa, waxeyna ka midtahay

afarta bilood ee loo yaqaan [..[الأشهر الحُرْم] bilaha xurmada leh..sida Quraanka kuxusan Nabigana صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ kusheegay sunnada. FADLIGA SOONKA BISHA AL-MUHARRAM, Guud ahaan waxaa kusoo arooray sunnada nabiga in ay fadli leedahay soonka sunnada ah oo lasoomo bishaan barakaysan ee AL-MUHARRAM sida kuxusan xadiiska ah:

(أَفْضَلُ الصِّيَامِ بَعْدَ رَمَضَانَ شَهْرُ اللَّهِ الْمُحَرَّمِ) (رواه مسلم)

Oo uu macnihiisu yahay: \*\* Soon kan ugu fadliga badan soonka ramamdaan kadib waa soonka bisha Al-muharram..."Muslim ayaa soo saaray".

Haddaba ayada oo fadligaas leh ayaa hadana waxaa ku dhexjirta maalin lagu magacaabo CAASHUURAA. MAALINTA CAASHUURAA: Waa maalinta 10aad (tobonaad) ee bisha Al-muharram

MUNAASABADDA SOONKEEDA: Waa maalintii uu Allaah ka badbaadiyay NABI MUSSE (عليه السلام) iyo qoomkiisa shartii Fircoon, marka shukri alaaah dartiis ayaan usoomayna malintaasna waxay ahayd maalinta 10aad ee bisha Al-muharaam.

FADLIGA CASHURA: Nabiga صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ Mar

lawaydiiyay soonka maalinta 10aad ee Al-muharram waxa uu ku jawabay: " waxaan Allaah kaga ajar dalbayaa inuu ii dambi dhaafo sanadkii ka horeeyay"

عن أبي قتادة رضي الله عنه قال : سئل النبي صلى الله عليه وسلم عن صيام يوم فقال : إني أحسب على الله أن يكفر السنة التي قبله . رواه مسلم عاشوراء ،

Dunuubta la isku dhaafayo waa kuwa yar-yar (al-sigaar) qofkii uu ka dhacay dambi wayn oo (kabiira) waxaa looga baahanyahay inuu Allaah tawbad(dambi dhaaf) dhab ah ula yimaado inta uu haysto fursada oo aysan kadin geeridu!!..Allaah hanoo dambi dhaafo amiin..

### **MARTABADAHA SOONKA CAASHURA:**

- 1-Sida ugu Dhameystiran: Waa in lasoomo maalin ka hor ama maalin kadib caashuura,oo ah soonka maalinta 9aad iyo 10aad iyo 11aad.
- 2-Sida ku xigta: Soonka 9aad iyo 10aad.
- 3-Sida ugu hooseysa: Soonka 10aad oo kaliya.

### **WAKHTIGA AY KU BEEGANTAHAY sanadkan:**

Maalinta 9aad: Axad 2/11/2014  
Maalinta 10aad: Isniin 3/11/2014  
Maalinta 11aad: Salaasa 4/11/2014

### **FAA'IIDOOYIN KOOBAN:-**

- 1-waxaa fiican oo mustaxab ah in loosoomo soonka maalinta caashuura,kudayasho lagu dayanano NABIGA " صلى الله عليه وسلم "
- 2-maalintaan waxaa soomay NABIGA (scw) iyo

saxaabadiisa waxaa kaloo hortood soomay  
NABI MUUSE.

3-waa maalin fadli wayn leh.

4-waxaa fiican in maalinta caashuura maalin kahor  
ama kadib laasoomo, khilaaf la  
khilaafayo YUHUUDA, oo ayagana maalintaan  
soomi jirtay.

5-Intaan ayaa kusoo aroortay fadliga  
maalinta "CASHURA", wax kale oo fadli ah ama  
camal kale oo lasameeyaa kuma sugnaan  
SUNNADA NABIGA(SCW).

Marka waxaa reeban oo BIDCA AH waxa ay  
sameeyaan dadka loo yaqaan "RAAFIDAH" ama  
"SHIICA" oo ah is dil iyo is mindiyeen iyo wixii  
la mid ah, waxaasna ma aha wax diinta ku banaan  
ama uu ALLAH iyo RASUULKIISU na amreen, qofka  
muslimka ahna waxaa la gudboon inuu ka  
dhawrtoonaado wax walba oo khilaafsan diinta  
Allaah uu kusoo dajiyay NABI MUHAMMAD(SCW),  
ayna tahay inuu raacdo jidkuu uu NABIGA(SCW)  
ujideeyay ummaddiisa ahna jidkii ay raaceen  
saxaabada iyo salafkii suubanaa Allaah haka raali  
noqdee dhamaantood.

6-Maalintaana waa fadli Allah uu nagu manaystay  
inuu nooga dhigay soon maalin qura dambi dhaaf  
sanad oo dhan, qof walowba waxaa ku deg-degtaa  
ka faa'iidaysiga maalintaan, kuna bilow  
sanadkaaga cusub (1436 HIJRIGA) daacada Allah

iyo ku tartanka khayraadka. Allah hanaga dhigo  
kuwii laga aqbalo camalkooda kiisa  
wanaagsan..aamiin                      aamiin                      aammiin.

hadaba Maadaama uu cimrigu yahay mid dhamaanaya, Aakhirana ay naga sugayso camal suuban, aduunyadiina dambi badatay, soo ma qumana inaan ka faa'iidayano fursadaha yaryar ee laakiin Dambi dhaafka weyn lagu helayo. Nabiga(NNKH) wuxuu yiri: Midka Caqliga badani waa kan naftiisa eedeeya ee aan is dhigan, mid Caajislowga ahna waa midka ilaahay meel cidla ah kutala saarta oo aan wax shaqo ah la imaanin. Naga saari mayso kaliya, Ilaahay waa Naxariis badan yahay hadaynan la iman dambi dhaaf iyo Orod, sida aduunyaduba aysan ugu iman XAGLO LAABAN.

Wabillaahi Tawfiif Wassamu Calaykum  
Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.  
ALLE SW SAREEYE KELIGIIS BAY MAHAD  
DHAMAANTEED U SUGNAATAY.